✓26-218

Cod bixinta ah HAA ee Xeerka 26-218 waxay ka dhigi doontaa maalgelinta lala soo daahay ee waddooyinkeena iyo buundooyinkeena duugoobay, in ay abuurto 37,500+ oo ah shaqooyinka qoysku mushahar ku filan ka helo, waxayna gacan ka geysan doontaa dib u dhiska dhaqaalaha degaankeena. Gobolkeenu wuu korayaa, iyada ciriiriga dhanka isku socodka gaadiidku uu isla hadaba ku soo noqday heerarkii cudurka baahsan ka hor. Waa in aanu qaadnaa tallooyin macno leh, wax ku ool ah si gacan looga geysto yareynta ciriiriga jira iyada oo aanan waxyeello loo geysanayn cimiladeena, dhaqaalaheena, iyo tayada nolosheena. Cod bixinta ah HAA ee Xeerka 26-218 waxaa lagu maalgelin lahaa basaska, tareenka fudud, waddooyinka lagu lugeeyo, iyo jidad ammaan ah ee guud ahaan gobolka iyada oo canshuur la qaadayo 9% ee ugu sareeya shirkadaha hodanka ah. Xeerka waxaa taageeray boqolaal ka tirsan ururada ku saleysan bulshada oo gacan ka geystay qaabeynta soo jeedinta qorshaha.

Waxyaabo dheeraad ah ka ogow: https://www.letsgetmoving2020.com/

Barnaamijka Get Moving wuxuu maalgelin doonaa:

- *Ilaa 45 mayl oo ah waddooyinka cusub oo lagu lugeeyo iyo 140 mayl oo ah laymanka baaskiilka/bushkuleetiga oo cusub, oo culeyska aad loo saarayo bulshooyinka midabyada kala duwan leh.*
- *120 mayl oo ah hagaajinta waddooyinka, iyo 280 oo ah waddooyinka lagu lugeeyo oo cusub oo la calaamadeeyay oo gobolkeena loogu kala soconayo si looga dhigo kuwo ammaan ah oo la geli karo.*
- *Nidaamka gaadiidka baska degdeg ah ee ugu horreeyay ee gobolku leeyahay.*
- *11 mayl oo ah khadadka cusub ee tareenka MAX.*
- *Gaadiid raacida dhallinyarada oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay dhammaan ardayda dugsiyada sare ee gobolkeena.*
- *Iyo 4,000 ah nalalka waddooyinka oo cusub si jidadkeena looga dhigo kuwo ammaan ah oo la geli karo.*

ISKU DIYAARINTA KORITAANKA IYO TARAAFIKADA: Marka uu dhaqaalaheenu soo kabto ee gobolkuna sii wado in uu kobco, waxaanu isla markiiba ku soo noqon doonaa ciriiriga dhanka isku socodka gaadiidka. Waxaanu u baahanahay in aanu tallaabo qaadno hadda. Sanadkii 2018-kii, qiyaastii 1,000 qof oo ah dadka cusub ee degaanka ayaa u soo guuray Gobol weynaha Portland. Qiyaastii hal milyan oo dad cusub ah ayaa gobolkan ugu yeeri doona in uu u yahay hoy tobbanaanka sano ee soo socda. Waa in aanu qaadnaa tallooyin macno leh, wax ku ool ah si gacan looga geysto yareynta ciriiriga jira iyada oo aanan waxyeello loo geysanayn cimiladeena, dhaqaalaheena, iyo tayada nolosheena.

MAALGELINTA JIDAD AMMAAN AH IYO WADDOOYINKA LAGU LUGEEYO: Dhammaanteen waxaanu u qalanaa meelo ammaan ah oo lagu lugeeyo isla markaana baaskiil/bushkuleeti lagu wato. Xeerkani wuxuu hiigsanayaa ilaha loogu talagalay waddooyinka lagu lugeeyo iyo waddooyin ammaan ah oo aada dugsiga, iyo sidoo kale wanaajinta ammaanka waddooyinkeena oo darawaliinta siiya wakhti dheeraad ah oo ay jawaab ku bixiyaan isla markaana dhiirigeliya dabeecada gaari wadista ammaanka ah.

KICINTA DHAQAALAHEENA: Dhaqaaleyahannada dhinacyada kala duwan ee siyaasadda ayaa isku raacsan in si loo bilaabo/kiciyo dhaqaalaheena oo uu shaqeeyo, dhaqaaqo, isla markaana uu markale horumar u sameeyo aanu u baahanahay in la maalgeliyo kaabayaasha iyo shaqooyinka degaanka.   Laga soo bilaabo barnaamijka New Deal ilaa laga gaarayo Sharciga Dib u soo kabashada iyo Dib-u-maalgelinta ee Maraykanka ee 2009: degaankeena, gobolkeena, iyo dalkeenu wuxuu mudnaanta siiyay maalgelinta gaadiidka inta lagu jiro wakhtiyada ay jirto hubin la’aan dhaqaale. Waan ognahay in taasi tahay habka u wanaagsan ee lagu xaqiijiyo in aan dib ugu soo muuqano inaga oo ka xoog badan sidii hore isla markaana u diyaarsan mustaqbalka aanu u qalano.

HORUMARINTA SINNAANSHAHA JINSIGA: Barnaamijka Let’s Get Moving ayaa sidoo kale inaga caawiya in qiimaha aanu leenahay laga dhigo mid lagu dhaqmo waxayna sameysaa maalgelinta gaadiidka oo muhiim ah oo ka jirta xaafadaha taariikh ahaan aan sida fiican adeega u helin halkaasi oo taariikh qorsheynta gaadiidka cunsuriyadu ku jirto ay keentay baahi sare oo loo qabo helitaanka gaadiidka, waddooyinka lagu lugeeyo, wanaajinta ammaanka, iyo maalgelinta kale. Way sahlan tahay in la iska dhaho Nolosha Dadka Madow Waa Mid Muhiim ah ‘Black Lives Matter’— waa arrin kale in maalgelin dhab ah la geliyo bulshooyinka midabyada kala duwan leh iyada oo halgan lagula jiro barakicinta.   Haddii aynu dhabtii aaminsanahay sinnaanshaha jinsiga iyo sixitaanka cunsuriyada la dhaxlay ee dalkani, ka dib markaa waa in aanu tallaabo qaadnaa oo isbeddelo sameynaa.

BALLAARINTA KALA DOORASHOOYINKA GAADIIDKA: Xeerkani wuxuu abuuri doonaa nidaamka gaadiidka baska degdeg ah ee ugu horreeyay ee gobolkeena wuxuuna dhisi doonaa khadka tareenka MAX oo dheeraad ah isla markaana sida aadka ah loogu baahnaa. Wanaajinta gaadiidkani waxay kordhin doontaa waxtarka iyo ammaanka, kordhinta wax helitaanka loogu talagalay bulshooyinka taariikh ahaan la takooray, iyo in la yareeyo wasakheynta dhanka kaarboonka.

WAX KA QABASHADA ISBEDDELKA DHANKA CIMILADA: Gaadiidku waa ka ugu weyn ee gacan ka geysta qiiqa gaaska sunta ah lagu sii daayo hawada inagu wareegsan ee Oregon gudaheeda. Ma jiro hal xeer ama tallaabo oo xallin doona dhibaatada, laakiin waan ognahay in wasakheynta dhanka kaarboonka la yareyn karo iyada oo la bixinayo waxyaabo beddel ah oo qofku kalidiis wadan karo baabuurka, oo ay ka mid yihiin, gaadiidka, wadashada baaskiilka/bushkuleetiga iyo socodka.
CUNISTA KUMANAAN SHAQO: Xeerkani wuxuu oggolaan doonaa maalgelinta sida aadka ah loogu baahnaa ee waddooyinkeena iyo buundooyinkeena duugoobay, isaga oo abuuri doona tobbanaan kun oo shaqooyin ah isla markaana gacan ka geysanaya dib u dhiska dhaqaalaha degaankeena isla waqtiga aan dib u dhisno nidaamkeena dhanka gaadiidka.